# Fahamka Caawinaadda Dheeraadka ah ee Ceymiska Caafimaadka ee Daawada Dhakhtarku Kuu Qoro

## Miiska ku jira


| | |
|---|---|
| Waa maxay caawimada dheeraadka ah ee aad Ka heli karto Medicare ee daawada laguu qoro? | 1 |
| Hantida iyo Dakhliga | 2 |
| Codsiga Caawinada Dheeraadka Ah | 3 |
| Ganaaxa Ka Daahidda Isdiiwaangelinta | 3 |
| Haddii aad tahay Ameerikaan Indiyaan ama Alaaska | 5 |
| Haddii aad tahay qof qoyska ka tirsan, daryeele, ama qolo sadexaad | 5 |
| Sidee Ayaan U Doortaa Ceymiska Caafimaadka? | 5 |
| Hay'adaha gobolku ma iga caawin karaan kharashka Medicare? | 6 |
| Racfaan ka qaadashada go'aanka | 6 |
| Sidee ku Heli karaa macluumaad dheeraad ah? | 8 |
| La Xiriirka Lambarka Bulshada | 8 |


## Waa maxay caawimada dheeraadka ah ee aad Ka heli karto Medicare ee daawada laguu qoro?

Qof kasta oo heysta Medicare waxa uu xaq u leeyahay ceymiska Medicare ee Daawada Dhakhtarku Qoro. Dadka hantidoodu iyo dakhligoodu yar yahay waxaa kale oo suurtagal ah in ay heli karaan Caawinada Dheeraadka Ah ee kharashka — kharashka ay bixiyaan bil kasta, lacagta sanadlaha ah ee ku soo beeganta, qeybta ay ka bixiyaan daawada — kharashyada kale ee la xiriira daawada ee Medicare. Caawinaadda dheeraadka ah waxaa lagu qiyaasaa ilaa $4,900 sanadkiiba. Dadka qaarkood xaq bay u leeyihiin mana ogsoona. Si aad u ogaato in aad xaq u leedahay, Lambarka Bulshada waxa ay doonayaan in ay ogaadaan keydkaaga, maalgelintaada, hantida ma guurtada (marka laga reebo guriga aad ku nooshahay) iyo dakhligaaga. Waxaanu

dooneynaa macluumaadkaaga iyo kan xaaskaaga/saygaaga, haddii aad is qabtaan oo wada nooshihiin.

Si Lambarka Bulshadu uga caawiso in ay go'aan ka gaaraan in aad xaq u leedahay caawinaad dheeraad ah, waxaa lagaa doonayaa in aad diiwaangeliso *Application for Extra Help with Medicare Prescription Drug Plan Costs (Codsiga Caawinaadda Dheeraadka Ah ee Medicare ee Daawada Dhakhtarka* (Form SSA-1020).

## Hantida iyo Dakhliga

### Waa Maxay Xadka U Go'an Hantida?

Si aad uga soo baxdo shuruudaha Caawinaadda Dheeraadka, qiimaha hantida waa in aanay ka badneyn $14,100 qofka kaligiis, ama $28,150 laba isu dhaxda ee wada degan.

Hantida waxaa ka mid noqon kara waxyaabaha qiimaha leh ee aad heysato. Tusaale ahaan:

- Hantida ma guurtada ah (marka laga reebo guriga aad ku nooshahay)
- Xisaabaha bangiyada xisaabta socota, keydka iyo keydka mudeysan
- Warqadaha lacagta
- Maalgelinta, oo ay ka mid tahay Maalgashiga Mareykanka
- Maalgelinta Suuqa
- Xisaabaha Qofka ee Hawlgabka (IRA)
- Lacagta cadaanka ee guriga ama meel kale kuu taal.

### Waa maxay waxyaabaha an hanti ahaan loo xisaabeyn?

**Ma xisaabeyno**:

- Guriga aad ku degan tahay;
- hantida aad qof ahaan u isticmaasho
- Gaarigaaga (gawaaridaada);
- Hantida aadan si fudud ugu bedeli karin lacag caddaan ah, sida dahabka iyo qalabka guryaha;
- Hantida aad u baahan tahay si aad u noolaato; sida guri aad kireysato ama dhul aad ku beerato cunto aad ku noolaato.
- Hantida aan ganacsiga aheyn ee aad ku noolaaneyso;
- Ceymiska nolosha qofka;
- Kharashka duugitaanka;
- Dulsaarka aad ka hesho lacagta aad ugu talo gashay in lagugu aaso; iyo
- Lacago kale oo aad heysato muddo sagaal bilood ah; sida:
  - —Lacagta gadaal laga soo xisaabay ee Lambarka Bulshada ama Macaashka Kabitaanka Dakhliga ee Lambarka Bulshada (SSI).
  - —Gargaarka guryaha (kirada);
  - —Canshuur laguu soo hormariyey ama kaaga soo noqtay canshuur dhaaf iyo canshuur dhaafka caruurta.
  - —Magdhaw aad ka heshay fal dambiyeed aad dhibane ka aheyd;
  - —Gargaarka guuritaanka ee aad gobol ama degaan kale ka guurtay.

La soo xiriir Lambarka Bulshada si aad u ogaato lacaga kale ee laga reebayo.

### Waa Maxay Xadka U Go'an Dakhliga?

Si aad uga soo baxdo shuruudaha Caawinaadda Dheeraadka, dakhliga sanadlaha ah waa in aanu ka badneyn $18,210 qofka kaligiis, ama $24,690 laba isu dhaxda.ee wada degan. Xitaa haddii dakhliga ku soo gala badan yahay, waxaa weli suurogal ah in aad xaq u yeelato. Tusaale ahaan haddii dakhliga ku soo galo badan yahay oo laga yaabo in adiga ama xaaskaaga/saygaaga aad xaq u yeelan kartaan Caawinaad Dheeraadah waxaa ka mid ah:

- Marka aad taageerto qof qoyska ka tirsan oo kula nool
- Dakhligu kaa soo galo shaqo aad shaqeyso
- Aad ku nooshahay Alaska ama Hawaii

### Waa maxay waxyaabaha aan dakhli ahaan loo xisaabeyn?

Lacagta caddaanka oo dhan looma xisaabo dakhli ahaan. Tusaale ahaan, **ma xisaabno**:

- Barnaamijka Gargaarka ee Nafaqeynta (Gargaarka Cuntada)
- Gargaarka guryaha (kirada);
- Gargaarka tamarta ee guryaha la siiyo.
- Ka daaweynta maandooriyayaasha;
- Gargaarka aafooyinka;
- Canshuur dhaafka qofka lagu siiyo lacagta uu shaqeysto
- Gargaar aad ka hesho meel kale oo bixiya kharashka gurigaaga.
- Magdhawga la siiyo dhibanayaasha; iyo
- Deeq waxbarasho iyo gargaarka waxbarashada.

La soo xiriir Lambarka Bulshada si aad u ogaato lacaga kale ee laga reebayo.

## Codsiga Caawinada Dheeraadka Ah

### Sidee ayaan ku codsadaa?

Codsiga Caawinada Dheeraadka Ah waa mid fudud. Buuxi Foomka Lambarka Bulshada ee *Application for Extra Help with Medicare Prescription Drug Plan Costs (Codsiga Caawinaadda Dheeraadka Ah ee Bixinta Kharashka Daawada ee Medicare* (Form SSA-1020). Waa sidan:

- Ka codsan kartaa barta internetka ***www.socialsecurity.gov/extrahelp***;
- La soo xiriir Lambarka Bulshada ee **1-800-772-1213** (TTY **1-800-325-0778**) si aad uga codsato telefoonka ama aad u codsato in laguu soo diro codsi; ama
- Ka codso Xafiiska Lambarka Bulshada ee degaanka.

Ka dib marka aad codsato, Lambarka Bulshada waxa ay eegayaan codsigaaga oo kuu soo dirayaan waraaq ay kugu wargeliyaan haddii aad xaq u yeelatay Caawinaadda Dheeraadka ah. Ka dib marka aad xaq u yeelato, waxa aad dooran kartaa ceymiska Daawada ee Medicare. Haddii aadan dooran ceymiska, Xarunta Medicare iyo Medicaid ayaa kuu dooraya. Hadba sida aad u dedejiso ku biirtaanka ayuu macaashku kuugu bilaabanayaa.

Haddii aadan xaq u yeelan Caawinaad Dheeraad Ah, waxaa suurogal ah in aad weli iska diiwan gelin karto ceymiska daawada ee Medicare.

## Ganaaxa Ka Daahidda Isdiiwaangelinta

### Ganaaxa Ceymiska Medicare ee Daawada

Haddii aadan iska diiwaan gelin Ceymiska Bixinta Daawada ee Medicare markii ugu horeysay ee aad xaq u yeelatay, waxaa suurogal ah in dusha lagaa saaro ganaax la daahidda aad la daahday is diiwaangelinta haddii mar dambe is diiwaangeliso. Waa in aad bixisaa ganaaxa marba haddii aad heysato ceymiska daawada ee medicare. Hase yeeshee, ganaax dusha lagaama saarayo haddii aad qaadato Caawinaad Dheeraad Ah ama barnaamij kale oo bixiya kharashka daawada laguu qoro.

***FIIRO GAAR AH:*** *Ganaaxa la daahidda is diiwaangelinta ceymiska Medicare ee kharashka daawada waa ka duwan yahay ganaaxa la daahidda is diiwaangelinta Medicare Qeybta B.Haddii aadan iska diiwaangelin Qeybta B markii ugu horeysay ee aad xaqa u yeelatay , waxaa suurogal ah in aad bixiso ganaax inta aad heysato ceymiska Qeybta B.Sidoo kale, waa in aad digtaa is diiwaangelinta, taasoo dib u dhigeysa Qeybta B.*

Macluumaad dheeraad oo ku saabsan xilliga isdiiwaangelinta, soo booqo ***www.medicare.gov*** ama ka soo wac **1-800-MEDICARE** (**1-800-633-4227**; TTY **1-877-486-2048**).

### Maxaan Uga Buuxinayaa Internetka?

Habka codsiga internetka waa mid amaan ah oo leh dhawr faa'iido. Waxa uu talaabo talaabo kuu tusayaa codsiga iyadoo shaashad laguugu

sharxayo ay wehliso. Shaashadu waxa ay kuu siineysaa macluumaadka aad u baahan tahay si aad u buuxiso foomka iyo sida aad uga jawaabeyso si buuxda su'aalaha. Waxa aad ka buuxin kartaa kombiyuutar kasta iyo waqtiga aad doonto. Waxa aad bilaabi kartaa oo joojin kartaa markii aad doonto, oo inta aad ka tagto ayaad u soo noqon kartaa maalin kale si aad u buuxiso macluumaadka lagaa doonayo. Aad baan uga taxadareynaa macluumaadkaaga shaqsiga ah.

## Maxaa la iga doonayaa in aan ka ogaado?

Inta badan su'aalaha codsiga ku jira waa hantida iyo dakhliga. Haddii aad qoys tihiin oo aad la nooshahay xaaskaaga/saygaaga, waxaa lagaa doonayaa macluumaadka labadiina. Xubnaha qoyska, daryeelayaasha iyo qofkii kale ee kaa caawiya buuxinta foomka. Jaantuska ku sawiran bogga xiga ayaa kaa caawinaya in aad go'aan ka gaarto in aad xaq u leedahay isagoo kaa caawinaya buuxinta codsiga dhabta ee Caawinaadda Dheraad Ah. Jaantuska **ma aha** codsigii aad buuxin laheyd.

## Si aad u diyaargaroowdo:

- Qor waxyaabaha aad gaarka u leedahay, la wadaagto xaaskaaga/saygaaga, ama qof kale, **laakiin Haku darin** gurigaaga, gaarigaaga, dhulka lagugu aasayo, ceymiska nafta, ama hantida shaqsi ahaaneed;
- Hubi dakhligaaga oo dhan; iyo
- Soona ururi wixii cadeyn ah ee aad heli karto si aad waqtiga uga faa'iideysato.

## Diiwaanada aad u baahan tahay waa:

- Warbixinta Xisaabta bangiyada, bangiyada deynta (credit unions), iyo hay'adaha kale ee maaliyadda.
- Warbixinta maalgelinta;
- Shahaadada warqadaha saamiyada;
- Canshuur celinta
- Qoraalada hawlgabka; iyo
- Qeybta dambe ee jeegga.

Kuma waydiisaneyo caddeyn muujineysa macluumaadka aad noo soo gudbisay, laakiin waxaan la barbar dhigeynaa macluumaadkaaga kan aan ka heli karno hay'adaha kale ee dawladda si aan u xaqiijino.

Waxaanu dooneynaa macluumaadka hantida iyo dakhligaaga (iyo kan xaaskaaga/saygaaga, haddii aad is qabtaan oo wada nooshihiin).

| Kheyraadka | Qiimaha |
|---|---|
| Xisaabaha bangiyada xisaabta socota, keydka iyo keydka mudeysan | $ _______ |
| Warqadaha ganacsiga, saamiyada, iyo xisaabta hawlgabka ee qof ahaaneed (IRAs) iyo maalgelinta kale | $ _______ |
| Lacagta cadaanka ee guriga ama meel kale kuu taal. | $ _______ |
| Guryaha marka laga reebo guriga aad degan tahay. | $ _______ |

| Dakhliga | Dakhli Bil Kasta |
|---|---|
| Macaashka Lambarka Bulshada | $ _______ |
| Macaashka Hawlgabka ee Shaqaalaha Tareenada | $ _______ |
| Macaashka halgamayaasha | $ _______ |
| Hawlgabka kale iyo lacagta isku ururtay | $ _______ |
| Masaariifta xaaska/sayga aad kala tagteen | $ _______ |
| Dakhliga saafiga ee kirada kaa soo gala | $ _______ |
| Magdhawga Shaqada | $ _______ |
| Dakhli kale (tusaale ceymiska shaqada, mid gaar aha ama naafanimada) | $ _______ |

| Dakhliga | Dakhliga Sanadkii |
|---|---|
| Mushahar | $ _______ |
| Dakhliga saafiga ee ganacsi gaar kuu ah | $ _______ |

## Haddii aad tahay Ameerikaan Indiyaan ama Alaaska

Bogga 2aad iyo 3aad ayaad ka heli kartaa shaxda hantida iyo dakhliga aan la tixgelineyn ee xadka hantida iyo dakhliga ee Caawinaadda Dheeraadka ah. Ameerikaan Indiyaanka iyo kuwa u dhashay Alsaka waxaa jira hanti iyo dakhli kale oo laga reebi karo.

Tusaaale ahaan, **Lambarka Bulshadu ma xisaabayo** hantida iyo dakhliga hoos ku xusan:

- Saamiga lacageed ee maalgelinta laga siiyo dadka u dhashay Alaska ay ka helaan Alaska Native Regional iyo Village Corporation;
- Dhulka ay dawladda dhexe rahnad ahaan uga heyso qof indiyaan ah ama qabiilka;
- Lacagaha ay keyd haan u hayaan Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee qabiilada Indiyaanka oo lagu qaybiyo dakhliga sanadlaha ah ee qabiilka;
- Ilaa $2,000 sanadkii oo lacagta la siiyo Ameerikaan Indiyaanka ee ka soo jeedda dulsaarka keydka ama dhulka la xakameeyey; iyo
- Lacagta la siiyo xubnaha ka tirsan qaar ka mid ah qabiilada Indiyaanka sida uu dhigayo sharciga dawladda dhexe.

La soo xiriir Lambarka Bulshada si aad u ogaato lacaga kale ee laga reebayo.

## Haddii aad tahay qof qoyska ka tirsan, daryeele, ama qolo sadexaad

Waad caawin kartaa dadka haysta Medicare in ay codsadaan Caawimaadka Dheeraadka ah ee daawada dhakhtarku qoro ee Medicare. Haddii aad qof ka caawiso buuxinta codsiga, waa in aad su'aalaha uga jawaabtaa sidii uu qofka uga jawaabi lahaa su'aalaha codsiga. Si aad u ogaato in qofku xaq u leedahay, Lambarka Bulshada waxa ay doonayaan in ay ogaadaan keydka qofka, maalgelintaada, hantida ma guurtada (marka laga reebo guriga aad ku nooshahay) iyo dakhligaaga. Waxaanu dooneynaa macluumaadka qofka aad caawineyso ama kan xaaska/sayga, haddii ay is qabtaan oo wada nool yihiin. Macluumaadka bogga 4aad ku yaal iyo shaxda bogga 4aad ayaa kaa caawinaya buuxinta codka.

Qof waad ka caawin kartaa inuu codsado Caawinaad Dheeraad ah adiga oo soo booqda bogga internetka ama soo waca telefoonka si aad u codsato *Application for Extra Help with Medicare Prescription Drug Plan Costs* (Form SSA-1020). Waxaad soo booqan kartaa Xafiiska Lambarka Bulshada ee degaanka si laguu caawiyo.

## Sidee Ayaan U Doortaa Ceymiska Caafimaadka?

Soo booqo ***www.medicare.gov***, oo adeegso xogta hoose oo kaa caawinaya in aad go'aan gaarto.

- **Isbarbardhigga noocyada kala duwan ee caafimaadka daawada ee Medicare** — Waxa aad ka heli kartaa oo is barbardhigi kartaa ceymiska daawada ee gobolkaaga ee ku haboon baahidaada gaarka ah oo aad iska diiwaangelin kartaa kan aad doorato.
- **Helitaanka Daawada aan shirkadii asliga aheyd ayna sameyn** — Waxa aad gelin kartaa macluumaadka daawo gaar ah oo aad qaadato si aad u hesho ceymiska bixinaya ee gobolka aad degan tahay ee la socon kara baahidaada daawada.

Si aad wax dheeraad ah uga ogaato ceymiska daawada ee Medicare iyo mudada gaarka ah ee isdiiwangelinta, fadlan soo booqo ***www.medicare.gov*** ama soo wac **1-800-MEDICARE**.

### Waa maxay waxyaabaha aan tixgelinayo marka aan is barbardhigayo ceymiska caafimaadka ee Medicare?

**Ceymiska** — Ceymiska daawada ee Medicare waxa uu bixinayaa daawada ay sameyso shirkadda asalka ah iyo kuwa aysan sameyn. Ceymiska intooda badan waxa ay bixinayaan daawada aanay soo saarin shirkadda asalka ah, kaasoo qeyb ka ah daawada ceymiska.

Daawada uu ceymisku bixinayo waa mid isbedeli karta, laakiin waa in ay noqotaa mid dabooli kara baahida Medicare.

**Qiimaha** — Lacagta aad bil kasta bixiso iyo qeybta kaaga soo beeganta daawada waxa ay ku xiran tahay nooca ceymiska ee aad doorato. Haddii aad xaq u yeelato Caawinaad Dheeraad ah hantidaada iyo dakhligaaga oo kooban darteed, waxaa lagaa caawinayaa qeyb ama gebi ahaan kharashkaas.

**Ku haboon** — Ceymiska daawada waa inuu qandaraas kula jiraa farmashiyaha degaankiina. Ka hubi ceymiska in farmashiyayaasha ay yihiin kuwa ceymisku ogol yahay.

### Sidee ayaan ugu biiri karaa ceymiska daawada ee Medicare?

- **Bogga internetka ee ceymiska** — Soo booqo bogga internetka ee ceymiska caafimaadka. Waxa aad kaga soo biiri kartaa barta internetka.
- **Bogga internetka ee Medicare's website** — Waxa aad kaga soo biiri kartaa ***www.medicare.gov*** adiga oo isticmaalaya is diiwaangelinta Medcare;
- **Codsiga Warqadda ahaan** — La xiriir shirkadda daawada ee bixineysa ceymiska caafimaadka ee aad dooratay, oo ka dooro codsi. Ka dib marka aad buuxiso foomka, ku soo dir boostada ama shirkadda faakis ahaan ugu soo dir.
- **Telefoonka** — Soo wac ceymiska ama soo wac **1-800-MEDICARE**, oo la hadal adeegayaasha macaamiisha.

## Hay'adaha gobolku ma iga caawin karaan kharashka Medicare?

Marka aad soo gudbiso codsigaaga Caawinaadda Dheeraadka Ah, waxa aad sidoo kale bilaabi kartaa Barnaamijka Kedyka ee Medcare. Barnaaijyadaas gobolku waxa ay ka caawiyaan dadka kale kharashka Medicare. Lambarka Bulshada waxa uu macluumaadkaaga u dirayaa gobolka ilaa aad ku muujiso codsigaaga Caawinaadda Dheeraadka ah in aan loo dirin. Gobolkaaga ayaa kula soo xiriiraya si ay kaaga caawiyaan codsiga Barnaamijka Kedyka ee Medcare.

Barnaamijka Kedyka ee Medcare waxa uu caawiyaa dadka hantidooda iyo dakhligoodu yar yahay inuu ka bixiyo kharashka Medicare. Barnaamijka Kedyka ee Medcare waxa uu ka caawiyaa bixinta lacagta bil kasta ee Medicare B (ceymiska medicare). Dadka qaarkood, Barnaamijka Kedyka ee Medcare waxa kale oo uu bixin karaa lacagta bil kasta ee Medicare Qeybta A (ceymiska isbitaalka), haddii uu jiro, iyo Qeybta A iyo B ee kugu soo beegaanta iyo qeybta kugu soo beegantay kharashka caafimaadka.

Medicaid iyo gargaarka caafimaadka waa barnaamijyo wada socda oo dawladda dhexe iyo gobol ee dadka ay hantidooda iyo dakhligoodu yar yahay. Gobol kasta sharciyo kala duwan ayaa uga degsan xaq u yeelashada iyo codsiga Medicaid. Macluumaad dheeraad ah kal xiriir xafiiska gobolka ee Medicaid.

## Racfaan ka qaadashada go'aanka

### Maxaan sameyn karaa haddii aanan ku raacsaneyn macluumaadka loo adeegsaday go'aanka xaq u yeelashada?

Lambarka Bulshadu waxa ay kuu soo dirayaan ogeysiis horudhac oo ka horeeya go'aanka haddii macluumadka aan heyno muujinayo in aadan xaq u laheyn Caawinada Dheeraadka Ah. Haddii aadan fahmin ogeysiiska, soo wac **1-800-772-1213**, iyaga ayaa kuu sharxi doona. Haddii aadan nagu raacsneyn macluumaadka aan heyno, soo wac lambarka kore ama soo booqo Xafiiska Lambarka Bulshada 10 cisho gudahood marka aad hesho ogeysiiska horudhaca ah ee ka horeeya go'aanka, ka dibna soo gudbi macluumaadka saxa ah.

Waxa aan kuu soo direynaa go'aanka kama dambeysta ah haddii aadan noo soo dirin macluumaad dheeraad ah 10 cisho gudahood. Waxaa laguu sharxayaa waxa aad sameyn

karto haddii aadan nagu raacsaneyn go'aanka kama dambeysta ah. Taas waxaa loogu yeeraa racfaan.

## Sidee ayaan racfaan uga qaadan karaa go'aanka kama dambeysta ah ee codsiga Caawinaadda Dheeraadka ah?

Haddii aad dooneyso in aad racfaan ka qaadato go'aanka Lambarka Bulshada ay ka gaartay xaq u yeelashada Caawinaad Dheeraad Ah ee kharashka daawada ee Medicare, soo booqo boggeena, ama soo wac oo weydiiso *Appeal of Determination for Extra Help with Medicare Prescription Drug Plan Costs (Racfaan ka Qaadashada Go'aanka Kama Dambeysta Ah ee Caawinaadda Dheeraadka Ah ee Ceymiska Medicare ee Daawada* (Form SSA-1021). Waxa aad codsigaaga ku soo diri kartaa Wilkes-Barre Data Operations Center, P.O. Box 1030, Wilkes-Barre, PA 18767-1030. Waxaad kale oo soo booqan kartaa Xafiiska Lambarka Bulshada ee degaanka.

## Maxaa dhacaya haddii aan racfaan ka qaato?

Marka aad codsato racfaan, waxaan ku weydiisaneynaa in aad noo sheegto sababaha aad ugu maleynayso in go'aankeenu u qaldan yahay. Inta badan, waxa aan kuu qabaneynaa balan lagu dhageysto oo dib loogu noqdo codsigaaga telefoonka. Si aad balanta u sameysato, waxa aan ku weydiisaneynaa in aad noo sheegto laba waqti oo adiga munaasib kuu ah oo aan ku soo wacno. Ka dib, waxaan kuu soo direynaa balanta dhageysiga oo aan kuugu sheegeyno taariikhda iyo waqtiga dhageysiga la qabanayo.

Haddii aad doorato in aadan ka qeyb qaadan dhageysiga telefoonka, waxaanu go'aan ka gaareynaa aniga oo akhrineyna macluumaadka galka ku jira, macluumaadka cusub ee aad noo soo dirtay si aan u hubino in aan gaarno go'aan sax ah. Dhageysiga waxaa loogu yeeraa dib u eegista.

Haddii aad codsatay dhageysi telefoonka ah ama in dib loo eego dacwadaada, waxaan kuu soo direynaa ogeysiis kale marka aan dhameystirno warqadaha muhimka ah ee dacwadaada.

## Muddo u go'an miyaa jirta racfaan qaadashada?

60 maalmood gudahood ayaad kaga qaadan kartaa racfaan taasoo ka bilaabanta marka ay ku soo gaarto warqadda aan kuugu sheegeyno go'aanka aan gaarnay. Haddii aadan racfaan kaga qaadan 60 gudahood, waxa aad waayeysaa xaqa aad u leedahay in aad racfaan ku qaadato go'aanka aan gaarney waxa uu noqonayaa kama dambeys. Haddii ay jirto sabab macquul ah oo aadan racfaan u qaaadan mudadii racfaanka, waxaa suuro gal ah in lagu siiyo waqti dheeraad ah. Mudada in laguu kordhiyo waxa aad ka codsan kartaa adiga oo soo waca **1-800-772-1213**.

## Mala iga caawinayaa codsiga racfaanka?

Waxa aad dooran kartaa in qof uu kaa caawiyo racfaanka ama wakiil kaa noqdo. Qofkaas waxa uu noqon karaa qareen ama qof kale oo aad garaneyso oo aqoon u leh nidaamka Lambarka Bulshada. Waxa aan la shaqeyneynaa wakiilkaaga sida aan adiga kuula shaqeyn laheyn. Iyada ama Isaga ayaa wakiil kaaga noqon kara arrimaha lambarka bulshada.

## Maxaa dhacaya haddii aan go'aanka ku diidanahay?

Haddii aadan ku raacsaneyn go'aanka Lambarka Bulshada ay ka gaaraan racfaanka, waxa aad dawladdda ka dacweyn kartaa maxkamadda degmada. Warqadda aan kuu sheegeyno go'aanka gudiga ayaa lagu faahfaahinayaa sida maxkamadda loo weydiisto in ay fiiriso dacwadaada.

## Sidee ku Heli karaa macluumaad dheeraad ah?

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan helitaanka Caawinaad Dheeraad ah ee ceymiska daawada ee Medicare, soo booqo ***www.socialsecurity.gov/extrahelp***, ama soo wac Lambarka Bulshada. Waxaa diyaar u ah in ay codsiga kaa caawiyaan wakiilada Lambarka Bulshada. Hadba sida aad u dedejiso ku biirtaanka ayuu macaashku kuugu bilaabanayaa.

Haddii aad dooneyso macluumaad la xiiira Barnaamijyada keydka ee Medicare, ceymiska daawada ee Medicare iyo sida loo codsado nuqul ka mid ah *Medicare & You* handbook (Buugga Medicare & Adiga), fadlan soo booqo ***www.medicare.gov*** ama soo wac **1-800-MEDICARE**. Xafiiska Kala Talinta Ceymiska iyo Barnaamijyada Gargaarka ee gobolka (SHIP) ayaa sidoo kale kaaga jawaabaya su'aalaha Medicare. Halka lagala xiriirayo xafiiska degaanka ee SHIP waxa aad ka heleysaaa dhinaca dambe ee buuga Medicare, barta internetka ee ***www.medicare.gov***, ama waxa aad codsan kartaa marka aad soo wacdo.

## La Xiriirka Lambarka Bulshada

Waxaa jira dhawr hab oo loola xiriiri karo Lambarka Bulshada, oo ay ka mid tahay barta internetka, telefoonka iyo in aad tagto xafiiska. Halkan waxa aan u joognaa in aan ka jawaabno su'aalahaaga oo aan kuu adeegno. In ka badan 80, Lambarka Bulshada waxa ay caawiyeen si ay maanta iyo mustaqbalka ugu guuleystaan iyagoo u fidiyey gargaar dhaqaale malaayiin dad ah oo halgan ugu jira nolosha.

### Booqo bartayada internetka

Sida ugu haboon ee meel kasta loogala soo xiriiro kaaro Lambarka Bulshada waa adiga oo soo booqda ***www.socialsecurity.gov***. Halkaas oo aad:

- Ka sameysan *my* Social Security xisaab oo aad kala socoto *Social Security Statement* (*Warbixinta Lambarka Bulshada*), ka hubiso lacagta aad shaqeysay, aad ka daabacan karto warqada xaqiijinta macaashka, ka bedeli karto lacagta bangiga laguugu shubo, aad ka daabacan karto foomka SSA-1099/1042S iyo kuwo kale;
- Ka codsan karto caawinaad dheeraad ah (Extra Help) ee ku saabsan daawada laguu qoro ee ceymiska caafimaadka ee Medicare;
- Waxa aad ka coddsan kartaa hawlgabka, naafada, iyo macaashka Medicare;
- Aad ka hesho nuqul ka mid ah daabacaadaha aan soo saarno;
- Aad ka hesho jawaabaha su'aalaha markasta la is weydiiyo; iyo
- Iyo kuwo kale oo dheeraad ah!

Adeegyada qaarkood waxa aad ku heli kartaa afka Ingiriisiga oo kaliya. Soo booqo barta Luqadaha kala duwan oo aad macluumaadka ku heli karto Af Soomaali. Waxaanu idiin heli karnaa tarjubaano lacag la'aan ah oo idinka caawin kara waxyaabaha aad uga baahan tihiin Xafiisyada Lambarkaaga Bulshada Waxa aan kuu heli karnaa tarjubaan haddii aad na soo wacdaan ama aad soo booqataan Xafiiska Lambarka Bulshada.

## Nagala soo xiriir

Haddii aadan heli karin internetka, waxaa jirta adeegyo dhameystiran oo aad telefoonka ku heli karto, 24ka saac, 7da cisho ee todobaadka. Nagala soo xiriir telefoonka lacag la'aanta ah ee **1-800-772-1213** ama numberka TTY, **1-800-325-0778**, haddii aad dhagaha la' dahay ama maqalku kugu adag yahay.

Haddii aad dooneyso in qof aad la hadasho, waxa aan telefoonka ka jawaabnaa inta u dhaxeysa 7da aroornimo ilaa 7da fiidnimo Isniinta ilaa Jimcaha. Waxaanu ku weydiisaneynaa in aad dulqaadato mudada aan mashquulsanahay oo telefoonadu badan yihiin ama aad mudo dheer khadka ku jirto. Waxaanu rajeyneynaa on aan kuu adeegno.

Securing today and tomorrow

**Social Security Administration**
Publication No. 05-10508-SO | February 2018
Fahamka Caawinaadda Dheeraadka ah ee Ceymiska Caafimaadka ee Daawada Dhakhtarku Kuu Qoro
Understanding the Extra Help With Your Medicare Prescription Drug Plan (Somali)
Produced and published at U.S. taxpayer expense
Waxaa lagu soo saaray oo lagu daabacay lacagta canshuur bixiyayaasha